Baadigoob: Jawaabta Goobjoogayaasha Caalamiga ah

Waxa Qoray Dr Michael Walls, Madaxa Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee Doorashadii Madaxtooyada ee Somaliland ee sannadkii 2017

Siddeed bilood a dib doorashadii Madaxtooyada Somaliland, iyo shan bilood ka dib markii lagu soo bandhigay warbixintii kama dambaysta ahayd magaalada London, waxa aanu ku faraxsannahay in aanu ku soo noqono Hargeysa si aanu warbixinta ugu soo bandhigno Somaliland gudaheeda gaar ahaan xilliga lagu jiro farxadda Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta ee Hargeysa. Taasi waxa ay fursad inoo siinaysaa in aynu dib u milicsanno codayntii iyo wixii ka dambeeyay, iyo in aynu isha ku hayno tallaabada tan xigta ee hayaanka dimuqraaddiyadda Somaliland – doorashada baarlamaanka ee inta badan dib u dhacu ku yimid ee hadda loo qoondeeyay in ay qabsoonto sannadka 2019ka.

Nasiib darro, waa in aynu marka hore ka hadalno dhacdooyin dhibaato gaysanaya oo isku xig-xiga.

Waxa aanu si dhow ula soconay dhacdooyinkii ugu dambeeyay, marka lagu daro sii daynta barnaamij daawasho ah oo loogu magac daray *Baadi Goob* iyo shir jaraa'id oo uu qabtay xisbiga Waddani 24 kii June 2018 iyo baaqyo is xigey oo ka soo baxay xisbiga Waddani; oo mid kasta la isku dayayay in farriin sababayn maxsuulka doorashada ah loogu dirayay muwaadiniintii iyo meelihii uu codka ka filayey xisbigu ee Somaliland.

Goobjoogayaasha Caalamiga ah – oo ku jooga Somaliland martiqaad uga yimid Guddida Doorashooyinka Qaranku – waxa ay gardarro u arkaan masuuliyad darrada tuhunka beenta ah ee nalagu soo leexiyay, iyo qaar keleba. Waxa aannu ka walaacsannahay dadka aad u tirada badan iyo hay'adaha tuhunkaas lala beegsaday.

Waxa aanu si walaac ku jiro hoosta uga xarriiqnay in tuhunnadaasi yihiin qaar aan isla socon isla markaana aan lahayn macno la taaban karo. Waxyaalaha loo soo bandhigay in laga dhigo caddaymo ee la xidhiidha Goobjoogayaasha Caalamiga ah ayaa si gaar ah u ah qaar aan wax xidhiidh ah la lahayn tuhunnada laftooda.

Waxa aanu mar kele ku celinaynaa sidii aanu horeba u sheegnay marar badan in Goobjoogayaasha Caalamiga ahi ay dhexdhexaad ka yihiin wax kasta, waxa aannuna tallaabooyin fiican ka qaadnay si aanu u hubino in ashkhaasta loo tirinayo in ay xagjir ku yihiin arrimaha siyaasadda ee Somaliland aan lagu soo darin goobjoogayaasha. Waxa markaa Khasab nagu noqotay in aanu ka saarno dhowr qof oo ay ku jiraan dad xidhiidh la lahaa labada xisbi ee ugu weyn siyaasadda Somaliland. Go'aannadaasi waxa ay dhaceen ka hor intii aan Guddida Doorashooyinka Qaranku aanay nala wadaagin amar ay ku sheegayaan in aanay u aqoonsan doonin Goobjoogaasha Soomaalida ah in ay qayb ka yihiin kuwa caalamiga ah.

Goobjoogayaasha Caalamiga ah laftoodu waxa ay sameeyeen go'aanno la xidhiidha xulista goobjoogayaasha iyaga oo dhegeysanaya talada guddida doorashooyinka, booliska Somaliland iyo qaar keleba oo talada wax ku darsaday. Iyada oo ay jiraan

waxaas oo dhami, haddana annaga ayay shaqadayada ahayd in aanu go'aan ka gaadhno sida aanu macluumaadkaas ka yeelayno. Tusaale ahaan, waxa ay ahayd in aanu go'aan ka gaadhno sida aanu uga fal-celinayno go'aankii Guddida Doorashooyinka ay ahaa in aan Soomaali lagu darin goobjoogayaasha caalamiga ah, waxa aanuna wax uga qabannay sidii ugu habboonayd ee aanu yeeli karaynay, annaga oo u ogolaanayna dadkaas in ay ku safraan tigidhada diyaaradaha ee loo iibiyay iyaga oo aan loo aqoonsanayn goobjoogayaal ahaan. Go'aannada caynkaas ahi waxa ay ahaayeen qaar adag, laakiin xulista goobjoogayaashu waxa ay ahayd mid annaga noo gaar ah. Aqoonsiga Goobjoogaha wax mar walba iska leh Guddida Doorashooyinka.

Doorashooyinka iyo siyaasadduba guud ahaan way hawlo badan yihiin, taas oo mararka qaarkood cidda ka qayb qaadataa ay la kulmi waayaan guushii ay finayeen. Waxaanu si buuxda u fahnsanahay niyad jabka ka yimaadda guul la'aanta siyaasadeed.

Si kastaba ha ahaatee, in tuhunno lagu gano dad aad u farabadan oo ka mid ah ururrada bulshada iyo xilalka dawladdu waxa uu leeyahay raad waxyeello loogu gaysanayo nidaamka Somaliland, iyo sidaas darteed Somaliland ba. Waxa cad soo muuqashada koox doonaysa in ay ku eedayso qof kasta oon iyaga ahayn fashilka kaga dhacay in ay gaadhaan hadafkoodii.

Waxa aanu mar kele ku celinaynaa natiijooyinka aanu ku soo bandhignay warbixintayada, war-saxaafadeedyada iyo xafladaha waawayn. Doorashadii madaxtooyada ee sannadkii 2017 may ahayn mid bilaa turxaan ah. Waxa jiray arrimo badan oo u baahan in wax laga qabto mustaqbalka, arrimahaasna waxa aanu ku faahfaahinnay warbixinta kama dambaysta ah iyo war-saxaafadeedyada kele. Si kastaba ha ahaatee, doorashadu guud ahaan waxa ay ahayd mid si aad u waangsan loo agaasimay. Faallayntayadu waxa ay si adag u sheegaysaa in si kasta oo cabashooyin iyo khaladaad u jiraan haddana aanaan xisbiyada kala raacin, sidoo kelena aannaan natiijada wax tanaasul ah ka samayn.

Waxa aanu ugu baaqaynaa dhammaan ururrada siyaasadda, iyaga oo dhawraya sumcadda wanaagsan ee Somaliland iyo dadkeeda, in ay u dhaqmaan si muddakar ah isla markaana ay ka fogaadaan tuhunnada iyo sheegashada aan loo meel dayin ee ka madhan caddaymaha.

Ugu dambayn, waxa aanu isha ku haynaa sannadka 2019 ka, waxa aanuna ugu baaqaynaa dhammaan daneeyayaashu in ay ka wada shaqeeyaan sidii ay u qabsoomi lahayd xilligii loogu talagalay. Waxa aanu rajaynaynaa, haddii ay noqoto in mar kele nalagu marti qaado, in aanu qayb ka noqono shaqo wacan oo aanu goobjoogayaan u noqono codayn guulaysata.